neighborcare health

# XARUMAHA CAAFIMAADKA

## EE KU SALAYSAN DUGSIYADA DHEXE







**Adeegyadan ardayda dugsiyada sare waxay kaheli karaan:**

- Denny International Middle School
- Madison Middle School
- Mercer Middle School
- Robert Eagle Staff Middle School
- Vashon Island High School

**neighborcare.org**

# Jir Caaimaad leh + Maskax Caaimaad leh = Arday Caafimaad leh

*Xarumaha caafimaadka ee ku salaysan dugsiyada ee Neighborcare Health waa adeeg caafimaad oo buuxa oo siiya ardayda adeegyada caafimaadka, caafimaadka dhimirka iyo adeegyada caafimaadka ilkaha ardayda. Kooxdeena xarumaha caafimaadka waxay iskaashi la sameeyaan kalkaaliyayaasha dugsiga, macalimiinta iyo shaqaalaha si ay u siiyaan ardayda adeegyo caafimaad oo leh badbaado, daryeel caafimaad oo dhaqan ahaan ku haboon dhalinyarada halka ay ku qaataan waqtigooda ugu vadan oo ah dugsiyada. Waxaan si wadajir ah u caawinnaa horumarinta caafimaadka ardayda iyo awooddooda ay ugu guulaystaan gudaha dugsiga iyo dibada.*

## Waxaan Joognaa Dugsigaaga

Xarumaheena caafimaadku waxay ku yaalaan 15 dugsi dadweyne oo ku yaala Seattle iyo Jasiirada Vashon. Adeegyada xarunta caafimaadka iyo ballamaha waxay diyaar u yihiin dhammaan ardayda dhigata Dugsiyada Dadweynaha Seattle iyo dhammaan ardayda dhigata dugsiyada dadweynaha iyo kuwa gaarka ah ee Jasiirada Vashon.

Booqo xafiiska hore ee dugsigaaga si aad u ogaato halka ay ku taalo xarunta caafimaadka Neighborcare Health ee dugsigaaga.

---

**NAGALA SOCO Instagram**
@Neighborcare_TeenHealth



## Adeegyada Waxaa ka mid ah:

- Qiimaynta iyo daawaynta dhibaatooyinka caafimaadka Guud
- Jimicsiga isboortiga
- Daryeelka caafimaadka ee ka hortagga ah
- Daryeelka caafimaadka taranka
- Talaalada
- La-talinta caafimaadka maskaxda ee shakhsi ahaan, qoys ahaan iyo koox ahaaneed
- Isku-duwidda qoyska si loo dhiso guri daryeel oo caafimaad leh
- Caawinta diiwaangelinta caymiska
- Wax kaqabadka qalalaasaha
- Gudbinta bulshada oo ku salaysan dugsiga
- Horumarinta caafimaadka iyo barashada caafimaadka
- Adeegyada ilkaha, oo ay ku jiraan baarista afka, nadaafada, raajada iyo buuxinta, ayaa laga bixiyaa xarumaheena caafimaadka qaarkood. Kala hadal xarunta caafimaadka dugsigaaga si aad wax badan uga ogaato.

Maalgelinta xarumaha caafimaadka waxaa qayb ahaan taageera **Qoysaska, Waxbarashada, Dugsiyada, iyo Promise of Levy** ee Magaalada Seattle iyo **Best Starts for Kids** investment ee Degmada King.

Tan iyo 1968, Neighborcare Health waxay ahayd xarun caafimaad oo bulsho oo lagu kalsoon yahay oo daryeel caafimaad oo dhammaystiran u fidisa bulshooyinka ku nool Seattle iyada oo aan loo eegin dakhliga ama xaaladda caymiska, sababtoo ah waxaan aaminsanahay in qof **kastaa uu u qalmo daryeel caafimaad oo tayo leh**.








## Isdiiwaan-geli Maanta

Buuxi oo saxiix foomamka diiwaangelinta xarunta caafimaadka si ilmahaagu u helo dhammaan adeegyada laga heli karo dugsiga. Foomamka waxaa laga heli karaa **neighborcare.org/clinics** ama xarunta caafimaadka ee dugsigaaga.

Sida uu dhigayo sharciga gobolka Washington, ardayda da'doodu ka yar tahay 18 jir waxay isu diiwaan gelin karaan adeegyada si qarsoodi ah. Neighborcare Health waxay ku dhiirigelisaa dhammaan ardayda inay ku daraan waalidkooda/masuulka go'aannada daryeelka caafimaadka. Haddii aad qabtid su'aalo ama walaac, fadlan la xiriir xarunta caafimaadka ee dugsigaaga.

## Ballamaha

Ballamaha waxaa la heli karaa maalmaha shaqada, kahor ama kadib inta lagu jiro iyo saacadaha dugsiga. Waanu xiranahay xilliga fasaxa dugsiga iyo fasaxa xagaaga. Xarunta caafimaadku waxay samayn doontaa wax kasta oo suurtagal ah si loo hubiyo in ardaydu ay seegaan wakhtiga fasalka ugu yar ee suurtogalka ah. Xarunta caafimaadku waxay siisaa Codsiga ku saabsan Warqadaha warbixinta ee ardayda balamaha wakhtiga dugsiga. Ardaydu waxay kaloo booqan karaan rugta caafimaadka iyagoon ballan ka qabin iyagoo fasax ka qaadanaya macalinkooda ama u gudbin kahelaya kalkaalisada dugsiga.

## Lacagta iyo Caymiska

Dhammaan ardayda Dugsiyada Dadweynaha ee Seattle iyo arday kasta oo ku nool Vashon waxay heli karaan adeegyada caafimaadka, ilkaha iyo caafimaadka dhimirka ee laga bixiyo xarun caafimaad oo ku taal dugsiga. Ma jiraan wax kharash ah oo loogu talagalay ardayda.

Neighborcare Health waxay ururisaa macluumaadka caymiska caafimaadka waxayna kharashaadka adeegyada u gudbisaa shirkadaha caymiska, laakiin caymiska looma baahna ardayda si ay u helaan daryeel caafimaad. Waxaan aqbalnaa qorshayaal caymis caafimaad oo badan, oo ay ku jiraan Washington Apple Health (Medicaid). LabCorp waxay sidoo kale biilasha ku dallacdaa qorshayaasha caymiska caafimaadka ardayda ee adeegyada shaybaarka. Qoysaska waxaa laga yaabaa inay helaan sharraxaad ku saabsan bayaanka faa'iidooyinka (EOB), laakiin ardayda iyo qoysasku ma heli doonaan bayaanka biilasha ee adeegyada aan caymisku dabooli.

Khabiirada u-qalmitaanka Caafimaadka ee Neighborcare ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan qoysaska iyo ardayda inay iska diiwaangeliyaan barnaamijyada caymiska caafimaadka. Ardayna looma diidi doono adeegyada sababtoo ah awood la'aanta inuu bixiyo.

***MARKA XARUNTA CAAFIMAADKA LA XIRO,*** *ardayda iyo qoysasku waxay ka heli karaan adeegyada caafimaadka, ilkaha iyo caafimaadka dhimirka ee rug kasta oo Neighborcare Health.*

*Iyada oo loo marayo shabakad ka kooban ilaa 30 xarumood oo ku yaal xaafadaha, dugsiyada iyo guryaha taageerada leh, kooxaha daryeelka waxay bixiyaan daryeel qof walba ah—oo ay ku jiraan adeegyada caafimaadka, ilkaha, caafimaadka habdhaqanka, iyo adeegyada farmashiyaha—oo ay weheliso inay ku xiraan adeegyada daboolaya baahiyaha aasaasiga ah sida cuntada iyo guryaha si loo fududeeyo caafimaadka iyo fayoobaanta.*

## Raadi xarun caafimaad oo ku-salaysan dugsi

### Dugsiga Hoose

**Neighborcare Health at Bailey Gatzert Elementary** D
1301 E Yesler Way, Seattle, WA 98122 | 206-548-3162

**Neighborcare Health at Dearborn Park Elementary** D
2820 S Orcas St, Seattle, WA 98108 | 206-548-3166

**Neighborcare Health at Highland Park Elementary** D
1012 SW Trenton St, Seattle, WA 98106 | 206-455-9025

**Neighborcare Health at Rising Star Elementary** D
8311 Beacon Ave S, Seattle, WA 98118 | 206-548-3168

**Neighborcare Health at Roxhill Elementary** D
7740 34th Ave SW, Seattle, WA 98126 | 206-452-2660

**Neighborcare Health at West Seattle Elementary** D
6760 34th Ave SW, Seattle, WA 98126 | 206-548-3164

### Dugsiga Dhexe

**Neighborcare Health at Denny International Middle School** D
2601 SW Kenyon St., Seattle, WA 98126 | 206-923-2809

**Neighborcare Health at Madison Middle School** D
3429 45th Ave SW, Seattle, WA 98116 | 206-933-7842

**Neighborcare Health at Mercer Middle School** D
7201 Beacon Ave S, Seattle, WA 98108 | 206-762-2394

**Neighborcare Health at Robert Eagle Staff Middle School** D
1330 N 90th St, Seattle, WA 98103 | 206-548-5770

### Dugsiga Sare

**Neighborcare Health at Ballard High School**
1418 NW 65th St. Seattle, WA 98117 | 206-548-3177

**Neighborcare Health at Chief Sealth International High School** D
2600 SW Thistle St, Seattle, WA 98126 | 206-938-1360

**Neighborcare Health at Lincoln High School**
4400 Interlake Ave N, Seattle, WA 98103 | 206-548-5760

**Neighborcare Health at Roosevelt High School**
1410 NE 66th St, Seattle, WA 98115 | 206-527-8336

**Neighborcare Health at Vashon Island High School** D
9600 SW 204th St, Vashon, WA 98070 | 206-548-7550

**Neighborcare Health at West Seattle High School**
3000 California Ave SW, Seattle, WA 98116 | 206-658-8048

## Raadi Rug caafimaad oo kuu dhaw

### Caafimaadka Caafimaadka, Ilkaha iyo Caafimaadka habdhaqanka

**Neighborcare Health at 45th Street** D Rx
1629 N 45th St, Seattle, WA 98103 | 206-633-3350

**Neighborcare Health at High Point** D
6020 35th Ave SW, Seattle, WA 98126 | 206-461-6950

**Neighborcare Health at Meridian** D Rx
10521 Meridian Ave N, Seattle, WA 98133 | 206-296-4990

**Neighborcare Health at Rainier Beach** D Rx
9245 Rainier Ave S, Seattle, WA 98118 | 206-722-8444

### Caafimaadka & Caafimaadka habdhaqanka

**Neighborcare Health at Columbia City** Rx
4400 37th Ave S, Seattle, WA 98118 | 206-461-6957

**Neighborcare Health at Lake City**
12721 30th Ave NE, #101, Seattle, WA 98125 | 206-417-0326

**Neighborcare Health at Magnuson**
7101 62nd Ave NE, Suite 4, Seattle, WA 98115 | 206-548-5790

**Neighborcare Health at Pike Place Market** Rx
1930 Post Alley, Seattle, WA 98101 | 206-728-4143

### Xafiiska Ilkaha

**Neighborcare Health at Georgetown** D
6200 13th Ave S, Seattle, WA 98108 | 206-461-6943

**Neighborcare Health at Pacific Tower** D
1200 12th Ave S, 4th Floor, Seattle WA 98144 | 206-548-5850

### Bukaanka ah hoy la'aanta

**Neighborcare Health at Ballard**
1753 NW 56th St, #200, Seattle, WA 98107 | 206-782-5939

**Neighborcare Health Youth Clinic at 45th Street**
1629 N 45th St, Seattle, WA 98103 | 206-633-7650

**Neighborcare Health Youth Clinic at New Horizons**
2709 3rd Ave, Seattle, WA 98121 | 206-633-7650

**Neighborcare Health Youth Clinic at Pike Place Market**
1930 Post Alley, Seattle, WA 98101 | 206-633-7650

D = Waxaa laga bixiyaa adeegyada ilkaha    Rx = Farmashiyaha goobta

**neighborcare.org**